



DHS oo Dhan DHAMMAAN HAL MEEL

Isticmaalida Barta Macmiilka ee One DHS

Barta Macmiilka ee One DHS (The One DHS Customer Portal) waa bog aad iskaa u isticmaali karto oo caawinya macaamiisha Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee (TDHS) (Tennessee Department of Human Services (TDHS) oo ay ku xirnaan karaan adeegyada soo socda oo si sahlan loo gali karo:

- Lacagta Kaalmada ee Daryeelka Caruurta (Child Care Payment Assistance)
- Masaruufka Ilmaha (Child Support)
- Mudnaanta Qoyska (TANF) (Families First)
- Barnaamijka Gargaarka ee Kabka Nafaqada (Supplemental Nutrition Assistance Program (SNAP))
- Gargaarka Masiibooyinka (Disaster/Relief Assistance)
- (D-SNAP, Kaalmada Lacageed ee Xaaladda Degdegga, EBT-da ee Safmarka, iwm.)

Barta Macmiilka ee One DHS wuxuu sahal ka dhigaya:

- Manfacyo soo codso
- Dukumentiyoo soo geli, ku soo dir, ka fiiri adeegyada la xirira
- Ka cusboonaysii xogta dadka aqalka qoyska iyo qaabka la idinkula soo xiriir
- Ka hubso kiiskaaga halka uu marayo
- Dib uga fiir ogeysiisyada kiiskaaga ku saabsan
- Racfaanka Feelka
- Ka hel jawaabbaha Su'aalaha Markasta La Isweydiyo



Ka Iskaangaree Sumadda kor ku qoran ama ka gal barta marka aad booqato:

<https://OneDHS.Tn.Gov>

Haddii hore aad u samaysatay magac iyo lambarka sirta ah ee lagu galo Barta Waalidka (Parent Portal) ee TDHS Relief Portals (Caawinta Lacagta Degdegga ah, D-SNAP, Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee Xanuunka Safmarka iyo/ama Kaalmada Daryeelka Ilmaha ee P-EBT), waxaad isticmaali kartaa macluumaadkaaga galitaanka ee aad ku gasho si aad u hesho adeegyada cusub ee Barta Macaamiilka. Haddii aanad haysan koonto lagu galo, samayso adigoo dooranaya "Koonto Cusub Samayso" ("Create Account New") ee ku qoran barta bogga lagu galo.

Barta waa inaad u isticmaashaa maaraynta koontada ee qatka internetka ee ku qoran adeegyada TDHS.



DHS oo Dhan DHAMMAAN HAL MEEL

Barta Internetka ee Macaamiilka ee

Turjun: Barta Macmiilka ee One DHS adiga oo isticmaalaya barta Google Translate si uu kuugu fidiyo macluumaadka aad uga baahan tahay luqadda aad dooratay. Kaliya si sahal u isticmaal liiska barta dalabka laga doorta Turjuman (Translate) ee ku yaal dhinaca geeska middig ee sare ee shaashadda si aad u hesho luqadda aad u baahan tahay.

Qaabka Raadinta: Qaabka raadinta ee sare ee bogga waxaa loo isticmaali karaa in lagu helo mawduucyo iyo adeegyo laga heli karo bogga internetka ee Dawladda Gobolka Tennessee.

Baro: Barta [Barta Macmiilka ee One DHS Barasho Aqoon](#) waa maqaallo la isku soo ururiyay oo ku saabsan barnaamijyada adeegyada ee Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee, borotokoollada, macluumaadka xiriirka iyo mowduucyada la xiriira kuwaas oo la arki karo marka aad doorato "Baro" ee ku jira Barta Macmiilka ee One DHS ama u gudub bogga hoose ee barta si aad u baarto Bar Aqoon. Macaamiishu waxay baari karaan xogta iyaga oo isticmaalaya ereyo muhiim ah, [baar barta xogta](#) mawduuc iyo [foomamka ka soo dejiso](#) si ay u daboolaan baahidooda.

Caawiyaha Ava the Virtual Assistant: Ava, Waaxda Adeegyada Bulshada ee Tennessee Caawiyaha Tooska ah ayaa ku toosin kara jawaabaha su'aalahaaga intooda badan oo ku siin kara dhibco aad kala hadasho xubnaha kooxda TDHS ee khuseeya Barta Macmiilka ee One DHS ama kiiskaaga. Ka raadi sawirka barta Ava la Hadal ("Chat with Ava") dhanka midig ee hoose ee bogga si aad u sheekeysato oo aad u hesho jawaabaha aad u baahan tahay. *Fadlan Ogsoonaw: Markaad barta macaamiilka aad u isticmaashid inaad ku gasho baraha Masruufka Ilmaha, Mudnaanta Qoyska ama SNAP, waxaa dhici karta in AVA aadan ka helin.*

Caawinaad Dheeraad ah:

Booqasho: www.tn.gov/content/tn/humanservices/apply-online-page/one-dhs-customer-portal.html

Ka **Xarunta Adeegga Caawinta Qoyska (Family Assistance Service Center)** wac 866-311-4287 ama la xiriir **Lacagta Kaalmada ee Daryeelka Caruurta (Child Care Payment Assistance Unit)** ka wac 833-740-1440. **Macluumaadka halka lagala xiriiriyo ee Masruufka Ilmaha (Child Support)** iyo **barnaamijyada kale ee TDHS** waxaa laga heli karaa qatka internetka ee: <https://www.tn.gov/humanservices/need-help-.html>